



MAXKAMADDA CADAALADDA EE KENTUCKY
XAFIISKA HELIDDA LUUQADAHA
XAFIISKA MAAMULKA EE MAXKAMADAHA

Adiga iyo Turjumaankaaga Maxkamadda
Bad-baadadaada inta uu jiro COVID-19

Maxkamaddu waxay rabtaa in adiga, turjumaankaaga maxkamadda, iyo qofkasta oo jooga maxkamaddu uu badqabo inta lagu gudajiro xaaladda gurmada ah ee COVID -19.

Turjumaankaaga wuxuu:

- Xiran doonaa gafuur-saab (turjumaanka luuqadda dhegoolaha ayaa laga yaabaa inuusan xiran gafuur-saab)
- Kuu jirsan doonaa ugu yaraan 6 fuudh, ilaa inta suurtagalka ah
- Raadin doonaa meelo gaar ah si uu u turjumo loona dhowro kala fogaaanshaha wanaagsan ee bulsheed
- Adeegsan doonaa sameecad ama qalab kale si uu kuugu turjumo isagoo kuu jira masafo nabdoon
- La shaqeyn doonaa shaqaalaha maxkamadda si qalabka looga dilo jeermiska
- Ka taxaddari doonaa inuu taabto waraaqaha dadka kale ay taabteen

Turjumaankaagu MA:

- Kugu salaami doono gacanta
- Kuu soo dhawaan doono si uu si khaas ah wax kuugu turjumo
- Kula wadaagi doono qalimo ama warqado
- Taaban doono taleefankaaga gacanta xitaa haddii ay tahay inuu ka eego ama turjumo caddeyn

Sida si baadbaado leh loogu joogo maxkamadda:

SAMEE:

- Ku dhaq gacmahaaga saabuun iyo biyo ugu yaraan 20 ilbiriqsi had iyo jeer:
 - Kadib markaad diifsato, qufacdo, hindhisooto, ama aad isticmaasho musqusha; iyo
 - Kahor intaadan cunin ama aanad isu diyaarin inaad ilmaha cunto siiso

HA Sameyn:

- Ha gacan qaadin qof, taaban batoonka wiishka, gacmo-qabsiga, ama gacantaa albaabka. Istimaal gacmo-gashi ama istiraasho, kadibna iska tuur
- Haddii aad taabato wax, ha taaban wajigaaga - gaar ahaan indhahaaga, sankaaaga iyo afkaaga - ilaa aad gacmahaaga dhaqaysid
- Ha ku taaban indhahaaga, sankaaaga, iyo afkaaga gacmo aadan dhaqin

Ka codso maxkamadda inay dib u dhigto taariikhda maxkamaddaada haddii:

- Aad leedahay astaamo ama aad kasoo bogsonayso fayraska korona, ama
- Xirfadle caafimaad uu ku faro inaad is-karantiishid

Haddii aad leedahay qareen, ka codso qareenkaaga inuu dib kuugu dhigo ballanta maxkamadda.